



Cusbooneysiinta ugu dambeysay:

Julaay 1, 2020

## Hagida Dib u furida Wajiga Koowaad – Hagida Gaarka ah ee loogu tallogalay Xarumaha Adeegashada iyo Moolalka

**Amarka:** Lambarka Amarka Fulinta 20-27, ORS 443.441, ORS 433.443, ORS 431A.010

**Khusaynta:** Xarumaha adeegashada iyo moolalka gobolada ku jiro Wajiga Koowaad iyo Labaad.

**Hirgelinta:** Ilaa xadkan uu hagistan u baahan yahay u hoggaansanaanta qodobbada qaarkood, waa wax la fulin karo sida lagu qeexay Amarka Fulinta 20-27, qaybta 26.

### Xarunta adeegashada iyo moolalka waa inay:

- Dib u eegaan ayna hirgeliyaan [Hagidda Guud ee Badrooniyaada](#).
- Qaabeeyaan goob kasta oo dadku ku badan yihiin sida goobaha cuntada iyo aaggaga fadhiga si ay u taageeraan joogteynta masafo ah ugu yaraan lix (6) fuudh oo u dhaxeeyso kooxaha (kuraasta, kuraasta dhaadheer, miisaska).
- Go'aamiyaan dadka ugu badan ee ku jiri kara xarunta dukaamaysiga ama suuqa si loo joogteeyo kala fogaanshaha jireed oo ah ugu yaraan lix (6) fuudh si habboona loogu xaddido soo galida.
- Ku dhejiyaan calaamado iridaha laga soo galo, kuwa laga baxo iyo goobaha dadku wadaagaan (aaggaga fadhiga, goobaha cuntada, iwm.) si ay kooxaha uga niyad jabiyaan isu imaatinka, una xusuusiyaan macaamiisha iyo shaqaalaha inay jir ahaan udhaxayso masafo ah lix (6) fuudh shaqsiyaadka ama kooxaha inta ay adeeg sugayaan.
- Dib u eegaan oo ay hirgeliyaan [Hagida Gobolka oo dhan ee Maaskaraha, Gaashaanka Wajiga, Daboolka Wajiga](#).

Ilaa iyo inta suurtagalka ah, xarumaha dukaamaysiga iyo suuqyada waa inay:

- Irido gaar ah u qoondeeyaan soo galida iyo ka bixida xarunta dukaamaysiga ama suuqyada si loo xakameeyo qulqulka dadka looguna dhiirrigeliyo macaamiisha inay jir ahaan kala fogaadaan. Wixii ah iridaha laga soo galo ee leh hal albaab ama hal albaab oo labo dhinac loo furo, tixgeli inaad u qoondeeyso soo galid kaliya ama ka bixid kaliya haddii uu jiro albaab kale oo laga soo galo/laga baxo macquulna tahay in dadku u socdaan hal dhinac. Ha xayirin iridaha ka-bixida ee loogu talagalay xiliyada dabka jiro.

## Ilo Dheeraad ah:

- [Calaamado aad dhejin karto](#)
- [Hagida Gobolka oo dhan ee Maaskarada, Gaashaanka Wajiga, Waji Daboolida](#)
- [Hagista Guud ee OHA ee Loo-shaqeeyayaasha](#)

**Helitaanka Dukumiintiga:** Wixii shakhsiyaadka naafada ah ama shakhsiyaadka ku hadla luuqad aan ka aheyn Ingiriis, OHA waxay ku bixin kartaa warbixinta qaabab kale sida fasiraadaha, daabacada balaaran, ama farta indhoolayaasha. Kala xiriir Mavel Morales lambarka 1-844-882-7889, 711 TTY ama [OHA.ADAModifications@dhsosha.state.or.us](mailto:OHA.ADAModifications@dhsosha.state.or.us).